



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8aad	Kulanka: 2aad
Taariikhda: 31da Agoosto, 2026	Goobta fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 11:18 AM	Saacadda uu xirmay: 11: 35 AM
Shir guddoonka fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, Mudane Biixi Iimaan Cige	Ajedayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Quraanka Kariimka 2. Anisixinta Ajandaha 3. Akhrinta 1aad ee hindise-sharciyeedka wax-kabeddelka qaybta 6aad ee sharciga iibka qaranka

Furitaanka Kulanka:

Senator Farxaan Cali Xuseen ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Aamus: Majirin

Diidmo: Hal Senator

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Maaliyada Mudane Biixi Iimaan Cige si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka wasiirka ayaa sharaxaad ka bixiyey sababaha keenay wax-ka-badalka iyo ahmiyada uu hindisahaani u leedahay guud ahaan dalka. Warbixinta wasiirka kadib, Guddoomiyaha ayaa waydiiyey Senatarada hadii ay jirto cid waydiin la xiriirta mabaadiida guud ee sharciga isaga oo faray Xoghayaha Guud in hindise-sharciyeedkaan loo gudbiyo guddiga ku shaqada leh.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray maamulka Golaha in hindise-sharciyeedkaan loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdulaahi ayaa kulanka soo xiray saacaddu markay ahayd 11: 35 AM.

DHAMAAD